

Wargeyska Mountain View

Abriil 6, 2016

Qamiis, Abriil 7.....Diiwaan Gelinta Xanaanada Ka Hor
Jimco, Abriil 8.....Diiwaan Gelinta Xanaanada Hore
Isniin, Abriil 11.....Diiwaan Gelinta Xanaanada Hore
Talaado, Abriil 12.....Barnaamijka Fiyoliinka Virtuoso, 5:00 p.m., Qolka Shirarka
Talaado, Abriil 12.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:15 a.m., CLC Qolka 183
Talaado, Abriil 19.....Diiwaan Gelinta Isu Diyaarinta Xanaanada Kuleylaha

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Macmacaanka waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maaalinta Talaadada, Abriil 12, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Barnaamijka Mountain View Virtuosos

Qaar ka mid ah ardaydena darajada kowaad iyo labad waxay muusiko iyo fiyoliin ka bartaan macalimiin heer sare ah, saacadaha ka dambeeyo dugsiga, laga bilaabo sannad dugsiyeedka. Waxaan ku magacaawney Mountain View Virtuosos. Waxaad fursad u heli doontaa in aad timaadid masrixiyadda ay ka dhigi doonaan qolka shirarka marka ay tahay 5:00 p.m. bisha Abriil 12. Waxaan si gaar ah u soo dhaweyneynaa waalidiinta haysata cunug ku jira xanaanada, maxaa yeelay waxaad habeenkaan ogaan doontaa sida cunugaada uga qeybgalo barnaamijkaan sannadka xiga.

Diiwaan Gelinta Xanaanada Hore (Pre-Kindergarten Registration)

Abriil 7, 8 iyo 11 waxaan bilaabi doonaa diiwaan gelinta barnaamijka Xanaanada hore **maalinta-buuxda** Caruurnimada Hore (Early Childhood). Diiwaan Gelinta waxaa lagu qaban doonaa xafiiska ku yaal **Glendale/Mountain View Community Learning Center, 1388 South Navajo Street**, laga bilaabo 8:30 a.m. ilaa 6:00 p.m. **Taariikhdaan kaddib, diiwaan gelinta waxay socon doontaa** saacadaha caadiga xafiiska, 8:00 a.m. ilaa 4:30 p.m. ilaa fasalada ka buuxsamaan.

Xanaanada Hore 2016-2017 fursadaha maalinta buuxda waxaa mar kale laga heli karaa Mountain View. Barnaamijkaan Caruurnimada Hore waxaa loo sameyay caruurta gaarta afar sanno ugu dambeyn Sateembar 1, 2016. Ardayda waxay tagaan Pre-K saacadaha dugsiga caadiga, 4 maalin todobaadkii, Isniin ilaa Qamiis. Waalidiinta waxay bil kasta bixiyaan kharashka waxbarashada oo ah \$150.00 ama waxay bixin doonaan sicir la dhimay oo ku saleysan dakhliga marka waalidiinta keenaan macluumaadkooda canshuurta 2015.

Xogta dagmada waxay taageersan tahay wixii ay tahay iyo tayada sare uu leeyahay barnaamijkaan Xanaanada Hore, waxayna muujisaa in faragelinta hore goor dambe fa'iido u leedahay dugsiga iyo nololaha. Barnaamijkaan maalinta buuxda wuxuu muujiyay in uu horumariyo dhaqaaqa, imaashada, iyo buundooyinka imtixanaadka.